





# BUUG-GACMEED

WAALIDKA





## GELITAANKA

Login (gelitaanka) Vklass waxaa loo samayn karaa siyaabo kala duwan. Si aad u ogaato qaabkay isticmaalaan dugsiga ilmahaagu, waxaad u baahan tahay inaad la xidhiidho dugsiga.

1. Iyadoo lagu galayo username iyo password bogga [www.vklass.se](http://www.vklass.se).
2. Iyadoo laga soo galayo portalka degmada. Xaaladdan oo kale waxa laguu soo bandhigi karaa, BankID, username, SMS login iyo noocyoo kala duwan oo kale, waxaanay ku xidhan tahay hadba sida kommun:ku u dejiyo nidaamkiisa.
3. Haddii aad gujiso -Välj organisation- (dooro ururka), waxaad liiska ka baadhi kartaa degmadaada. Ka dibna waxaad ku gali kartaa habka aad rabto, sida Bank ID ama username iyo password.



## DEJINTA IYO DOORASHADA LUQADEED

Si aad u gasho Setup:ka (dejinta) kuu gaarka ah, riix avatarkaaga dhanka midig ee sare oo ka dooro -Inställningar-daaqadda kuu soo baxaysa.

Si aad u bedesho luqadda (iswiidhish iyo Ingiriisi oo keliya), guji calaamadda su'aasha ee ku xigta magacaaga oo ka dooro luqadda daaqadda kuu soo baxaysa.

Marka ugu horraysa ee aad gasho Vklass, waxa kuu soo baxaya bogga dejinta (Inställningar). Tani waa si loo xaqiijiyo maclumaadkaaga xidhiidhka, gaar ahaan e-maylka iyo lambarka telefoonka. Si aan mar walba bogga dejintu(Inställningar) kuugu soo bixin waa inaad gujisaa badhanka "Spara" (kaydi) ee ku yaal bogga xaggiisa hoose.

Haddi ciwaankaagu cusub yahay ama uu otomaatig u soo galay Vklass (laga soo xigtay barnaamij kale oo dugsigu isticmaalo), waxa laga yaabaa in lagu waydiyo inaad xaqiijiso e-maylkaaga. Waxaad samaynaysaa xaqiijinta adigoor raacaya tilmaanta ku qoran e-maylka kuu soo dhacaysa markaad kaydiso e-mayl cusub, ama aad gujiso badhanka "Skicka verifieringsbrev" (Dir warqad xaqiijin) oo soo baxaya haddii ciwaanka aan la xaqiijin. Fadlan ogow in aanay muhiim ahayn in la xaqiijiyo ciwaanka si dugsigu e-maylada kuugu soo diro. E-maylka dugsigu wuu gaadhayaa ciwaannada aan la xaqiijin sidoo kale, laakiin xaqiijintu waa hab dugsigu ku hubinayo in ciwaannada e-maylka ee nidaamka ku jiraax sax yihiin.



## OGOLAANSHAHAA

Oggolaanshaha (samtycken) Vklass waxaa loo sameeyay si loo bixyo maarayn ogolaansho oo sharciga waafaqsan oo ammaan ah oo u sahlan dhammaan shakliyada waxbarasho. Maareynta dhijitaalka ah waxay beddelaysaa maaraynta waraaqaha gacanta, taasoo u sahlaysa mas'uuliyiinta inay akhriyaan oggolaanshaha iyo in dugsigu akhriyo warbixinnda xilligaa jirta. Dhammaan dugsiyada uma shidhaa qaybtan barnaamijku.

### SIDA WAALIDKU U MAAREEYO OGOLAANSHAHAA IMMIKA

Mas'uuliyiinta waxay bogga oggolaanshaha ka galayaan App:ka iyo browserka. Waxay tan samaynayaan iyagoo gujinaya magacooda geeska kore ee midig ka dibna "Samtycken" (Oggolaansho). Liisku wuxuu ku tusayaa ogolaanshaha laga sugayo aqbalaadda iyo ogolaanshaha uu mas'uulku ka jawaabay oo taariikhaysan.

Waalidiintu waxa keliya ee ay ka jawaabi karaan ogolaanshaha magacooda, oo sidoo kale ma arkayaan in ogolaanshuu khuseeyo dhammaan waalidiinta iyo in kale. Oggolaansho la aqbalay waa la beddeli karaa wakhti kasta. Hadaa oggolaanshaha lala noqdo ama la diido waxay ku siinaysaa "Godkänner ej" (Ma oggola).



The screenshot displays the Vklass application's contact person management feature. On the left, a sidebar menu lists various features: START, KALENDER/SCHEMA, ÖVERLÄMNINGAR, OMSORGSSCHEMA, FRÄNVARO OCH LEDIGHET, DOKUMENTATION, RESULTAT, VECKORAPPORTER, UTVECKLINGSSAMTAL, DOKUMENT, KLASSLISTA, KOMMUNIKATION, and LÄNKAR. The main content area is titled "KONTAKTPERSONER" and contains instructions: "Här lägger du in kontaktpersoner som är bra för skolan att känna till. Du behöver inte lägga in personer som redan lagts in av annan vårdnadshavare – de listas längst ner på sidan." It shows two contact entries for "KAROLIN LARSSON": one for Anna Larsson (Namn: Anna Larsson, Telefonnummer: 0701234567) and one for Oskar Larsson (Namn: Oskar Larsson, Telefonnummer: 0701234567). A mobile phone icon on the right shows a simplified version of the contact list screen.

## MACLUUMAADKA XIDHIIDHKA

### SIDA WAALIDKU U MAAREEYO MACLUUMAADKA XIDHIIDHKA

Mas'uuliyiintu waxay bogga macluumaadka dadka lala xidhiidhayo ka galayaan App:ka iyo browserka. Waxay tan samaynayaan iyagoo gujinaya magacooda geeska kore ee midig ka dibna "Kontaktpersoner" (Dadka lala xidhiidhayo). Halkan wuxaad gelisaa cidda lala xidhiidhi karo ee ay fiican tahay in uu ogaado dugsiga barbaarantu ama dugsigu. Haddii aad rabto in aad qofka sawirkiisa ku darto, ku samee daaqadda bidix ee "Välj fil" (Dooroo faylka). Ilaa shan qof ayaa macluumaadkooda lagu dari karaa.



The screenshot displays the Vklass platform across two devices. On the left is a desktop browser window showing a sidebar with navigation links like 'START', 'KALENDER/SCHEMA', 'ÖVERLÄMNINGAR', 'OMSORGSSCHEMA', 'FRÄNVARO OCH LEDIGHET', 'DOKUMENTATION', 'RESULTAT', 'VECKORAPPORTER', 'UTVECKLINGSSAMTAL', 'DOKUMENT', 'KLASSLISTA', and 'KOMMUNIKATION'. Below this are sections for 'OMSORGSTID' (07:00 - 15:00) and 'IDAG' (Marockansk böngryta, Spaghetti bolognese). On the right is a mobile phone showing a similar interface with a sidebar, a 'JUST NU / NÄSTA LEKTION' section (08:00-09:20 SO), and a 'IDAG' section (Mentorstid 9A, Rödbetsbiffar med rotfruktsgratäng, Hamburgare med pommes frites). Both screens feature student profiles (LUDVIG, ELIOT) and a green Vklass logo.

## BOGGA HORE IYO LIISASKA XULASHO

Fikradda bogga hore (Startsida) waa inuu degdeg kuu siiyo aragtida guud ee maalinta iyo usbuuca dugsi ee carruurtaada iyo inuu ku tuso warbixinna muhiimka ah ee dugsiga.

Haddii aad isticmaalayo shaashad yar, ama mobilka, "swipe-garee" (jiid oo sii daa) magaca carruurta si aad rogrogto bogagga carruurta kala duwan.

Riix badhanka "Fler dagar" (Maalmo Dheeraad ah) si aad u aragto dhammaan hawlaha dugsiga ee toddobaadka.

Liisaska bidix (Meny) wuxuu ku geynayaa fankshannada(qaybaha shaqo)ee kala duwan. Liisaska bidix (Meny) ee buluugga ku calaamadsan wuxuu sheegayaa bogga aad immika ku jirto.

Marka moobil aad isticmaalayo, liisaska bidix (Meny) waa la laabi karaa ama la fidin karaa adigoo riixaya calaamadda saddexda xarriijimood ee siman leh. Cinwaanka ku xiga calaamaddu wuxuu kuu sheegayaa bogga aad immika ku jirto.



Haddii aad rabto inaad qariso maclumaadkaaga xidhiidhka ee liiska fasalka, waxaad ka samayn kartaa bogga "Inställningar" (Dejinta). Wahaad "Inställningar" ka heli kartaa adigoo gujinaya magacaaga midigt sare ee shaashadda, ka dibna ka dooro "Inställninga" meny:ga soo baxaya.

#### START (BILOW)

Dulmarka degdegga ah ee maalinta iyo usbuuca dugsi ee carruurtaada iyo warbixinada muhiimka ah ee dugsiga.

#### KALENDER/SCHEMA (KALENDARKA/JADWALKA)

Jadwalka dugsiga carruurtaada oo ay ku jiraan waxqabadyada kale sida shaqada-guri, hawlo shaqo, imtixaano, maalmo fasax, ballamaha wadahadalo horumarineed, dalxiisyo, qorshayn iyo mawduucyo ay carruurtu immika ka shaqaynayaan.

#### ÖVERLÄMNINGAR (WAREEJINTA)

Waxa kaliya ee aad arkaysaa qaybta "överlämningen" marka dugsiga barbaarinta ama dugsigu uu tan ku sameeyay appka Vklass:ka ee aad weliba dooratay inaad dirto maclumaadka. Wahaad markaa maclumaad ku dari kartaa goobta qoraalka ee hoos tiamaadda "Vårdhadshavarens del" (Qeybta Mas'uulka). Wahaad heli kartaa dhammaan dukumeentiyada wahaadna arki kartaa dhammaan maclumaadka, oo ay ku jiraan maclumaadka xidhiidhku. Dhammaan dugsiyadu ma laha qaybtan.

#### OMSORGSSCHEMA (JADWALKA DARYEELKA)

Haddii carruur kuugu jirto dugsiga barbaarinta ama fritidshem, wahaad cusbooneysiin kartaa waqtiyada keenista iyo kaxaynta, oo aad fariin u qori kartaa shaqaalaha, si ay u ogaadaan waqtiyada ilmahaaga ee dugsiga xannaanada ama fritidshem:ka.

#### FRÅNVARO OCH LEDIGHET (MAQNAANSHAHА IYO FASAXA)

Soo sheeg maqnaashaha ilmahaaga haddii ay dhacdo, tusaale ahaan, uu xanuusanayo ama booqanayo dhakhtarka ilkaha.

Codso fasax haddii aad maqnaanayso muddo dheer.

Dhammaan dugsiyada uma shidna qaybtan barnaamiju.

#### DOKUMENTATION (DUKUMENT GARAYN)

Haddii carruur kuu dhigato dugsiga barbaarinta ama fritidshem, waha qaybtan ku jiri kara sawirro iyo qoraallo ay dugsiga barbaarintu ama fritidshem:ku kugu tusayaan waxqabadyadooda.

#### RESULTAT (NATIIJO)

Qaybtan waxa loogu talgalay waalidka leh caruur dhigata dugsiga hoose/dhexe ama sare. Waha halkan ku jira "händelser, ämnesöversikt iyo betyg" oo ah (dhacdooyinka, dulmarka maaddooyinka iyo darajooyinka.) Waha "händelser" aad ka arkaysaa natiijooyin ku saabsan maaddo gaar ah ama shaqo koorsa. Waha "ämnesöversikt" aad ka arkaysaa



qiimayno iyo faallooyin ku saabsan maaddo ama koorsooyin gaar ah. Fasallada hoostooda, waxaad arkaysaa heerka teeramka ubadka iyo fasalka u dambeeyaa. Dhammaan dugsiyada uma shidna qaybtan "betyg" (darajooiyinku).

#### VECKORAPPORTER (WARBIXINNO TODDOBAADLE AH)

Waxaad halkan ka arkaysaa warbixinnada toddobaadlaha ah ee lixdii bilood ee la soo dhaafay, kuwaas oo toos loogu soo diro e-maylkaaga dhammaadka usbuuca. Warbixinnadani waxay soo koobayaan waxa dhacay, iyo waxa ka dhici doona, ee loogu talo galay carruurtiinna dugsiga. Dhammaan dugsiyada uma shidna qaybtan barnaamijku.

#### UTVECKLINGSSAMTAL (WADAHADALKA HORUMARINEED)

Haddii macalinku soo dhejiyay waqtiyo ballan wadahadal horumarineed, halkan ayaad adiga iyo ilmahaagu ka ballansan kartaan. Halkan ayaad ka arkaysaa waqtiyada bannaan ee aad ballan u qaban karto carruurtaada, iyo sidoo kale waqtiyada aad hore u ballansatay.

#### DOKUMENT (DUKUMENTI)

Ka qayb qaado dokumentiyada muhiimka ah ee maamulka dugsiga ama macalinka fasalka ilmahaagu soo dhejiyay.

#### KLASSLISTA (LIISKA FASALKA)

Eeg liiska carruurta kale ee dhigata fasalka ilmahaaga, oo hel macluumaadka xidhiidhka ee waalidiinta kale ee fasalka. Dhammaan dugsiyada uma shidna qaybtan barnaamijku.

#### KOMMUNIKATION (XIDHIIDHKA)

Halkaan waxaad kala xidhiidhi kartaa macallinka fasalka, maamulka dugsiga, macallinka maaddada ama shaqaalahaa kale ee dugsiga.

#### LÄNKAR (LINKIYADA)

Guji si aad u furto. Halkan waxaad ka helaysaa linkiyo uu dugsigu ku daray. Badana waa linkiyo adeegyada elektarooningga ah ee sida caadiga ah loo isticmaalo ee waalid ahaan ku khuseeya. Dhammaan dugsiyada uma shidna qaybtan barnaamijku.



## KALENDER/SCHEMA(KALEENDARKA/JADWALKA)

Haddii aad leedahay dhowr carruur ah, waa inaad doorato jadwalka ilmaha ama carruurta ee aad rabto inaad eegsto. Haddii aad ilmo keliya leedahay, caadi ayuu kuugu so baxayaa. Waxaad riixi kartaa dhacdooyinka jadwalka badankooda si aad u aragto faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan dhacdada (händelsen).

Xulashooyinka midabbada leh Casharrada, Hawlaha, Dhacdooyinka Jadwal, Maalmaha Fasaxa iyo Qorshahaynta, waxaad dooran kartaa inaad shiddo ama bakhtiiso noocyada kala duwan ee dhacdooyinka jadwalka. Tusaale ahaan, waxa loo isticmaali karaa inaad aragti guud ka heshid imtixaanada soo socda ee ubadkaaga iyo shaqooyinkooda.

Talol

Calaamadda ka qaad dhacdooyinka oo dhan marka laga reebo doorashada doogga ah ee "Uppgifter" oo calaamadi dhammaan carruurtaada. Kadib dooro inaad Kalendarka ku daalacato qaab bileed si aad u hesho aragti guud oo ah dhammaan imtixaanada carruurtaada, shaqada guriga iyo hawlaha shaqo.



The screenshot shows the Vklass software interface. On the left is a sidebar with various menu items: START, KALENDER/SCHEMA, ÖVERLÄMNINGAR, OMSORGSSCHEMA, FRÄNVARO OCH LEDIGHET (selected), DOKUMENTATION, RESULTAT, VECKORAPPORTER, UTVECKLINGSSAMTAL, DOKUMENT, KLASSLISTA, KOMMUNIKATION, and LÄNKAR. The main area has tabs for FRÄNVAROANMÄLAN, FRÄNVARORAPPORT, and LEDIGHETSANSÖKAN. Under ANMÄL FRÄNVARO, there are three students: Ludvig, Elsa, and Eliot, each with a checkbox next to their name. Below them is a date selector showing "Idag, 29 november" with an option for "Annan period". A "SKICKA" button is at the bottom. To the right, a mobile phone screen displays the same interface, showing the names of the students and the "SKICKA" button.

## MAQNAANSHAHADYO FASAXA

Dhammaan dugsiyada uma shidha qaybtan barnamijku. Haddii ogeysiinta maqnaanshaha iyo codsiga fasaxaba la dooran karo

waxaad fankshankan ka helaysaa xagga ugu darraysa. Fränvaroanmälan (Ogeysiinta maqnaanshaha) ayaa hore u sii calaamadsan.

### FRÄNVAROANMÄLAN (OGEYSIINTA MAQNAANSHAHADYO)

Soo sheeg maqnaanshaha hal ilme ama dhowr carruur ah. Wawa hore u sii calaamadsan in maqnaanshuhu khuhseeyo maalinta oo dhan taasoo ku calaamadsan "Idag" (maanta), iyo taariikhda maanta). Haddii aad soo sheegayo maqnaanshe wakhti kale, tusaale ahaan booqasho dhakhtar ilkeed oo badhtamaha maalinta ah, waxaad dooran kartaa "Annun period" (xilli kale).

Xagga hoose ee bogga waxaad ka arkaysaa warbixinnada maqnaanshaha ee lixdii bilood ee la soo dhaafay. Istimmaal badhamada "Ta bort" eller "Avsluta nu" si aad u tirtirto maqnaansho mustaqbalka qorshaysan ama mid socda u joojiso.

### LEDIGHETSANSÖKAN (CODSI FASAX)

Haddii ilmahaagu ama carruurtaadu ay maqnaanayaan muddo dheer waxaad codsan kartaa fasax. Sharciiga dugsiga ee codisga fasax waxa uu ku qeexan yahay xagga sare ee bogga.



Fasaxa waxa la codsan karaa laga bilaabo ugu horreyn berri, iyo inta maalmood ee aad rabto. Waa in had iyo jeer la sheegaa sabab saldhig u ahaanaysa dugsiga markay fasaxa ogolaanayaan ama diidayaan.

Markaad codsanayso fasax waxaad heli doontaa e-mayl xaqiijinaysa codsigaaga. Farriinta e-maylku waxay u tagaysaa dhammaan mas'uuliyiinta ilmaha. Marka dugsigu oggolaado ama diido codsi, e-mail ayaa loo diraa dhammaan dadka ka mas'uul ah ilmaha.

Xagga hoose ee bogga waxaad ka arkaysaa codsiyada fasax ee lixdii bilood ee la soo dhaafay. Guji codsi si aad u aragto sharraxaadda iyo sababta suurtogalka ah ee dugsigu u diiday. Wuxaan sidoo kale masixi kartaa codsiga fasax mustaqbalka qorshaysan.



The screenshot shows the Vklass app interface. On the left is a sidebar with navigation links: START, KALENDER/SCHEMA, ÖVERLÄMNINGAR, OMSORGSSCHEMA (selected), FRÄNVARO OCH LEDIGHET, DOKUMENTATION, RESULTAT, VECKORAPPORTER, UTVECKLINGSSAMTAL, DOKUMENT, KLASLISTA, KOMMUNIKATION, and LÄNKAR. The main content area is titled "OMSORGSSCHEMA" and shows "Visa föregående vecka" (View previous week). It lists three weeks: VECKA 48, VECKA 49, and VECKA 50. Each week has a grid for days (MÅN, TIS, ONS) and times (e.g., 08:00-16:00). Notes are provided for specific times, such as "Ludvig stannar hemma idag." and "Ludvig kommer ca 1 timme senare pga tandläkarbesök som drar ut på tiden." A mobile phone view on the right shows a summary of the current day's schedule for "IDAG - ONSDAG 29 NOVEMBER".

## OMSORGSSCHEMA (JADWALKA DARYEELKA)

Dugsiyada barbaarinta iyo xanaanooyin badani waxay isticmaalaan qaybta "omsorgsschema" (jadwalka daryeelka). Kani waa jadwalka ilmaha ee koobaya waqtiyada keenista iyo kaxaynta ee hugsiga barbaarinta ama fridshem:ka. Jadwalka daryeelku wuxuu ka kooban yahay laba qaybood: grundscha och tillfälliga schemaändringar (jadwalka aasaasiga ah iyo isbeddellada jadwal ee ku-meel-gaadhka ah).

### GRUNDSCHA (JADWALKA AASAASIGA AH)

Jadwalka aasaasiga ah waa jadwal wareegaya oo bilaabmaya hal maalin ka dibna socda ilaa lagu beddelayo jadwal cusub oo aasaasi ah.

Jadwal aasaasi ah oo fudud wuxuu tusaale ahaan ka koobnaan karaa usbuuc (Isniin-Jimce) oo leh xilli keenitaan 08:00 aroornimo iyo xilli kaxayn 16:30 maalin kasta. Jadwalkan ayaa kadibna soo noqnoqonaya toddobaad walba.

Jadwal aasaasi ah oo ka horumarsan waxa uu noqon karaa jadwal afar todobaadle ah oo xilliga keenitaanka iyo kaxaynta ilmuu ku kala duwan yihiin maalin kasta afartaa todobaad. Marka afarta toddobaad ee ugu horreeya la dhaaf, jadwalkii oo waqtiyadiisi leh ayaa dib u bilaabmaya mar kale. Habayntan oo kale waxay tusaale ahaan u fiicnaan kartaa qofka xaruntiisa shaqadu leedahay jadwal bille ah.



1. Dooro ilmaha/carrurta jadwalka aasaasiga uu khuseeyo.
2. Dooro taariikhda jadwalka aasaasiga ah bilaabanayo, tusaale ahaan Isniinta soo socota.
3. Magac u bixi jadwalkaaga aasaasiga ah (si ay kuugu fududaato helitaankiisu hadhow haddii aad rabto in aad koobbi ka sameyso/dib u isticmaasho).
4. Geli wakhtiga keenista iyo kaxaynta ee maalinta ugu horeysa.
5. Guji plus (+) maalinta xigta si aad u koobiyeysa wakhtiga keenista iyo kaxaynta ee maalintii hore, kadibana halkaa ka hagaaji waxaad u baahato. Kadib qaabkaa maalinba maalintay ka dambayso ku sii wad jadwalkaaga aasaasiga ah.
6. Markaad dhameyso guji "Spara".

#### TILLFÄLLIGA SCHEMAÄNDRINGAR (ISBEDELLADA JADWAL EE KU MEEL GAADHKA AH)

Marka la eego jadwalka ilmaha waxaad caadiyan aragtaa waqtiyada jadwalka aasaasiga ah. Laakiin badanaa isbeddel ayaa lagu sameeyaa waqtiyadan. Waxaa laga yaabaa in maalin sababo awgeed xilli danbe ilmaha la geynayo dugsiga barbaarinta, jimce fasax la iska qaataay safar dheer ka dib ama maalin kalena ayeeyaaba timid oo xilli hore soo kaxaynaysa ilmaha.

Isbeddelkan jadwalka aasaasiga lagu samaynayo ee temboreeriga ah waxaa toos loogu sameeyaa bogga jadwalka iyadoo la jiidayo sliders-yada xilliyada keenista ama kaxaynta, ama iyadoo mouse-ka lagu dul haynayo maalinta oo la gujinayo fallaadha hoos tilmaamaysa. Markaad mobilka ka isticmaalayso waxaad cadaadin kartaa meel kasta oo maalinta ka mid ah si aad u bilowdo inaad wax ka beddesho. Wuxa kale oo suurtogal ah in maalinta la beddelay farriin loogu diro shaqaalaha. Markaad dhameyso beddelka waxaad gujisaa "Spara".

Isbeddellada jadwalka ku-meel-gaadhka ah waxaa lagu calaamadeeyay sawir yar oo maclumaa ah maalinta. Waxaad masaxi kartaa isbedeladaada ku-meel-gaadhka ah ee hal maalin adigoo furaya oo doorta "Återställ" (Soo Celi). Markaad doorato "Återställ", waxay waqtiyada keenista iyo kaxaynta iyo weliba wixii farriimo ah ku noqonayaan kuwii jadwalka aasaasiga ah.



The screenshot shows the Vklass application interface. On the left, a sidebar menu includes: START, KALENDER/SCHEMA, ÖVERLÄMNINGAR, OMSORGSSCHEMA, FRÄNVARO OCH LEDIGHET, DOKUMENTATION (selected), RESULTAT, VECKORAPPORTER, UTVECKLINGSSAMTAL, DOKUMENT, KLASSLISTA, KOMMUNIKATION, and LÄNKAR. The main area displays several documentation posts with photos and text. A large central image shows a child playing with a camera. To the right, a mobile phone screen displays the same content, illustrating the app's responsive design.

## DOKUMENTATION (DUKUMENT GARAYN)

Qaybita "Dokumentation" waa qoraalllo taxane ah, sida blogg oo kale, oo dugsiyada barbaarinta iyo fritidshem:yadu u isticmaali karaan si ay u tusaan una diiwaangeliyaan waxqabadyadooda.

### LABA MUUQAAL (VY)

Waxaad dokumentation:ka ku tusi kartaa muuqaal blogg ama muuqaal guud. Mobilku waa muuqaal blogg:eed oo keliya oo aad hoos u soconayso si aad u aragto dokumentiyada kale. Muuqadka blogg:eed waxaad ka arkaysaa maclumaad yar oo ku saabsan qoraal kasta, sida isku xidhka manhajka, qorshayaasha iyo faylal dheeraad ah oo ku lifaaqan. Muuqaalka blogg:eed sidoo kale rogrogji kartaa sawirrada haddii ay jiraan sawirro dhawr ah oo ku xidhan qoraalka.

### KOMMENTARER (FAALLOOYINKA):

Guji qoraalka ama linkiga "Visa alla kommentarer" (Tus dhamaan faallooyinka). Waxaad markaa akhriyi kartaa faallooyinka dadka kale oo aad ka faalloon kartaa qoraalka.

### CIDDA QORAALKU KU SAABSAN YAHAY

Qoraal kasta waxaad ka arki kartaa cidda loogu talo galay qoraalka meesha sawirka:



Waxa kale oo aad arki kartaa ilmaha ama carruurtaada uu saameeyo qoraalkani.



The screenshot displays the Vklass software interface. On the left, a sidebar lists various modules: START, KALENDER/SCHEMA, ÖVERLÄMNINGAR, OMSORGSSCHEMA, FRÄNVARO OCH LEDIGHET, DOKUMENTATION, RESULTAT, VECKORAPPORTER, UTVECKLINGSSAMTAL, DOKUMENT, KLASSLISTA, and KOMMUNIKATION. The KOMMUNIKATION module is highlighted with a blue background. The main content area is titled 'KOMMUNIKATION' and contains fields for 'Välj mottagare \*', 'Ämne \*', and 'Meddelande \*'. A large blue 'SKICKA' button is at the bottom. To the right, a mobile device screen shows the same communication form, indicating responsive design.

## KOMMUNIKATION (XIDHIIDHKA)

Wada-xidhiidhka dugsigu waa e-maylka. Markaad fariin ka dirto qaybtan, waxa loogu diri doonaa e-mayl ahaan qofkay ku socoto, oo kadib kaaga soo jawaabi kara sidaasoo kale. Waxa sidaas darteed muhiim ah inaad leedahey cinwaan e-mayl oo diiwaan gashan. Waxaad diiwaan gelinaysaa qaybta "Inställningar" adigoo gujinaya magacaaga xagga midigtu ee sare.



The screenshot shows the Vklass application interface. On the left is a sidebar with various navigation options: START, KALENDER/SCHEMA, ÖVERLÄMNINGAR, OMSORGSSCHEMA, FRÄNVARO OCH LEDIGHET, DOKUMENTATION, RESULTAT, VECKORAPPORTER, UTVECKLINGSSAMTAL (selected), DOKUMENT, KLASLISTA, KOMMUNIKATION, and LÄNKAR. The main content area has tabs for BOKNINGAR, INNAN, UNDER, and EFTER. Below these tabs is a section titled "UTVECKLINGSSAMTAL" with two sub-sections: "Mina bokade tider" and "Tillgängliga tider". Both sections list students (Elev) and teachers (Lärare) with their names and profile pictures. A mobile phone icon on the right shows a simplified view of the booking screen with a green circular button at the bottom.

## WADAHADALKA HORUMARINEED

Haddii macallinku soo dhejiyay waqtiyo ballameed oo "Utvecklingssamtal" (wadahadal horumarineed), halkan ayaad waqtii ka ballansan kartaa. Dooro wakhtiga iyo maalinta aad rabto inaad ballansato. Waxaad ballansan kartaa hal waqtii ilmo kasta. Haddii aad khalad samaysay, waxaad kansali kartaa ballanta aad qabsatay oo aad mid cusub dooran kartaa.

### SIDEE AYUU WAALIDKU U BALLANSADAAN WADAHADAL HORUMARINEED?

Sawirku waxa uu ku tusayaa sida waalidku kombuyuutar ama app uga qabsan karo ballanta wadahadalka horumarineed isaga oo isticmaalaya meny:ga bidix. Mas'uulku waxa keliya ee uu ballansan karaa hal waqtii/macallinkiiba, sidoo kale ballansashadu waxay khuseysaa hal ilme iyo dhammaan mas'uuliyiinta. Marka wadahadal horumarineed la ballansado, suurtogal ma aha in wakhiyyada kale ee bannaan loo ballansado ilmaha iyo macallimiinta. Waxa Vklass lagu samayn karaa kansalaadda ballanta wakhti kasta. Waqtiyada ballamaha la kansalay waxa si toos u arki doona mas'uuliyiinta kale.

### U DIYAAR GAROW WADAHADALKA HORUMARINEED

Marka mas'uulku gujiyo qaybaha INNAN (KA HOR), UNDER (INTA LAGU JIRO) ama EFTER (KADIB) wuxuu marka hore dooranayaa waqtii ballan wadahal. Calaamadda doogga ah ee geeska hoose waxa mas'uulku sidoo kale ka arki karaa wadahadalladii horumarineed ee hore iyo dokumentiyada la xidhiidha.



Qaybaha (Tabs:ka) kala duwan waxa ka soo bixi kara khaanad qoraal oo uu ka jawaabayo ardayga dugsiga hoose/dhexe/sare ama khaanad qoraal oo loogu talogalay mas'uuliyiinta. Marka laga reebo khaanadda qoraalka ee tabsyada kala duwan, mas'uuliyiintu waxay arki karaan natijjooyinka, tirakoobka imaanshaha, qoraalladii wadahadaladii hore iyo faylasha la xidhiidha.

Mararka qaarkood waxay macallimiintu soo dhejyaan su'aalo ay tahay in mas'uuliyiintu ka jawaabaan ballanta wadahadalka ka hor. Dhammaan dugsiyada uma shidha qaybtan barnaamijku.



**Vklass**

Macluumaad dheeraad ah ayaa laga heli karaa boggayaga  
taageerada.

Ka eeg ciwaanka "Vårdnadshavare" (Mas'uulka),  
<https://support.vklass.se>.

Ma qabtaa su'aalo ku saabsan Vklass?  
La xidhiidh dugsiga ilmahaaga iyagaa ku caawin doona!